

Macluumaadka bukaanka ee loogu taloglay gudbinta degdega ah **Macluumaadka warqada ku qoran waxuu sharxayaa sababta uu** **dhakhtarkaada ilkaha ama indhaha uu isbitaal kuugu wareejiyay,** **macnaheedu waxa uu yahay iyo waxa lagaa doonayo in aad** **sameeyso**

Maxay tahay sababta isbitaal la iigu gudbiyay si deg-deg ah?

Deg deg ayaa laguugu diray sababtoo ah dhakhtarkaada ilkaha ama indhaha waxuu dareemayaa in calaamadaha ku haayo ay u baahanyihiin baaritaan dheeri ah waxuuna kuu diray qof takhasus ama aqoon dheeraad ah leh. Waxaad filan kartaa in dhakhso lagu arko si loo ogaado waxa kugu dhacay ama kaa khaldan.

Tani macnaheedu ma in aan Kansar qabaa?

Waxaa jiro xaalado guud oo badan oo lala xiriiriyo calaamadahan, oo ay kamid tahay suurto galnimada Kansar. Inta badan dadka dhakhsaha loo gudbiyo Kansar ma qabaan.

Haddii ay dhacdo in Kansar lagaa helo, markaas hubinta in la ogaado xanuunka aad qabto xilli hore ayaa macnaheedu yahay in ay u dhowdahay in daaweeyntu ay waxtar badan yeelato, sidaas darteed ayeeyna muhiim u tahay in dhakhso lagu arko.

Madaama gudbintan ay dhakhso tahay, waxay ka dhigan tahay in ballan lagaaga sameeyn doono isbitaalka muddo labo todobaad gudahood ah waxaase suurto gal ah in ay hal todobaad gudahiis noqoto. Waxaa laga yaabaa in lagaaga baahdo in baaritaano badan lagaa qaado afarta todobaad ee soo socoto si xanuunkaada dhakhso loo ogaado.

Maxuu dhakhtarkaada ilkaha ama indhaha u baahanyahay in uu ogaado?

- Waxaad hubisaa in dhakhtarkaada ilkaha ama indhaha uu haaysto cinwaankaada saxda ah iyo taleefoon lambarkaada oo uu kamid yahay taleefoonkaada gacanta haddii aad leedahay taleefoon gacan maadaama laga yaabo in isbitaalka uu taleefoon kugula soo xiriiro.
- Haddii aadan ballan ku imaan karin labada todobaad ee soo socoto gudahood, fadlan u sheeg dhakhtarkaada ilkaha ama indhaha.
- Haddii aad turjubaan u baahanatahay, fadlan dhakhtarkaada ilkaha ama indhaha u sheeg si ay turjubaan kuugu diyaariyaan.
- Haddii aadan isbitaalka ballan ooga helin muddo ah labo todobaad gudahood, fadlan la xiriir dhakhtarkaada ilkaha ama indhaha.

Kadib maxaa xigayo?

Dhakhtarkaada ilkaha ama indhaha ayaa macluumaadkaaga u gudbin doonaa isbitaalka. Kadibna isbitaalka ayaa kulasoo xirrirayo si uu ballan kuugu sameeyo, Waxaa kale oo

suurtogal ah in isbitaalka uu kuusoo diro macluumaad dheeri ah oo ballanta ku saabsan oo ay kamid yihiin haddii ay jiraan baaritaan lagu sameeynayo maalinta aad tageeyso.

Markii aad aqbasho taariikhda ballanta waa muhiim in aad tagto ballanta. Fadlan wac lambarka warqadda ballanta ku qoran si aad isbitaalka dhakhso ugu wargaliso haddii aadan ballanta tagi karin.

Maxaa dhacayo markaan isbitaalka tago?

Markii ballanta isbitaalka lagu sameeyo inta badan waxaad la kulmeysaa qof takhasus leh ama waaxa laguugu sameeyn doonaa baaritaano lagu ogaanayo xanuunka ku haayo. Inta aadan ballanta imaan ayaa lagu sheegayaa haddii baaritaano lagaa qaadayo markaad ballanta xaadirto, sidaas darteed fadlan hubi in aad raacdo waxii tilmaamo ah ee horeey lagu siiyay.

Waad soo wadan kartaa qof saaxiib kaa ah ama qoyskaada ah, maadaama laga yaabo in ay ku caawiso haddii aad wax wal-wal ah ka qabto in aad fahmi waayso waxyaabaha ay kooxda caafimaadka kaala hadli doonaan.

Wax su'aalo ah?

Haddii ay jiraan wax aad ka wal wal santahay ama aad qabto wax su'aal ah oo ku saabsan isbitaalka lagu gudbiyay, fadlan wac dhakhtarkaada ilkaha ama indhaha si aad ula hadasho qofkii isbitaalka kuu gudbiyay

Meelo aad macluumaad dheeri ah ka heli karto.

<https://www.cancerresearchuk.org/>

<https://www.macmillan.org.uk/information-and-support>